

# Aragtidaada soo gudbi: Adeeg casri ah, oo dhijitaal ah

Janaayo 03, 2023 [Weydiimaha saxaafadda](#)

Dadka reer Alberta waxaa lagu casuumayaa in ay nala wadaagaan aragtidooda ku aaddan baahiyahooda, waxyaabaha ay filanayaan iyo muhiimadaha ku saabsan sidii ay adeegyada dowladda ugu heli lahaayeen qaab onleen ah taasoo ay kusoo gudbinayaan xog aruurrin onleen ah.

Haddii ay noqoto maaraynta kaalmooyinka, helista guryo qiimo jaban iyo daryeelka caruurta ama soo cusboonaysiinta shatiga darawalnimada, dadka reer Alberta waxay adeegyada dhijitaalka ah u adeegsanayaan si sidii hore ka badan.

Waaxda teknoolojiyadda iyo ikhtiraacyada Alberta ayaa ah awoodda ka danbaysa iskudhafka dhaqaalaha gobolka. Waa lagama maarmaan in dowladdu la socoto teknoolojiyadda, sida adarteed dowladda Alberta waxay diyaarinaysaa istiraatijiyyad dhijitaal ah si ay u casriyayo adeegyadeeda. Istiraatijiyyaddani waxay sare u qaadi doontaa ikhtiraacidda iyo teknoolojiyadaha dhijitaalka ah guud ahaanba dowladda si ay u bixiso adeegyo wanaagsan, degdeg ah, casrina ah.

Marka laga tago xog aruurinta dadweynaha ee onleenka ah, dowladda Alberta waxay la xiriiri doontaa hogaamiyeysaashaa shirkadaha tiknoolojiyadda, machadyada wax lagu barto ee dugsiga sare ka danbeeya, ururada caafimaadka iyo bulshooyinka asalka ah si ay u maqasho afkaartooda ku saabsan qaabka ugu wanaagsan ee ay ula tacaamuli karaan waaxyaha dowladda Alberta. Aragtiyaha la aruuriyo waxay gacan ka gaysanaysaa qaabaynta Istiraatijiyyadda Dhijitaalka ee Alberta.

Xog aruurintu waxay noqon doontaa mid ay dadka reer Alberta heli karaan ilaa Janaayo 24keeda si ay u buuxiyaan.

## Xaqiiqooyinka kooban

- Istiraatijiyyadda Dhijitaalka ee Alberta waxay gobolka u horseedaysaa casriyaynta kooxaha farsamayaqaanka ah, nidaamyada iyo guud ahaanba qaabka dowladdu u waajahayso teknoolojiyadda iyo wax ikhtiraacidda.
- Adeegyada onleenka ah waxay dadka reer Alberta qarashka iyo lacagta ka baxaaya ayaga oo meesha ka saaraya baahida loo qabo ka fasax qaadashada shaqada, safridda iyo uhelidda daryeel caruurta.
- Wakhti xaadirkaan waxaa jira in ka badan 70 adeegyo dowladeed oo onleen ah kuwaas oo xilli kasta diyaar u ah dadka reer Alberta, meel kasta oo ay joogaan, ayaga oo isticmaalaya qalabka ay rabaan.
  - Ilaa gu'gii 2019, 30 kamid ah adeegyada dowladda ayaa u wareegay qaab onleen ah.
  - Wakhti xaadirkaan, Teknoolokiyadda iyo Ikhtiraaciddu waxay waaxyaha kale kala shaqaynaysaa sidii 20 adeeg oo kale loogu soo dari lahaa hanaanka onleenka ah sannadka soo socda.
  - Laga bilaabo Janaayo ilaa Diisambar 2021, isticmaalka adeegyada dowladda ee laga isticmaalayo alberta.ca wuxuu sare u kacay in ka badan 300 boqolkiiba, ayada oo ka isticmaalidda adeegyadani moobeelada ay sare u kacday ilaa 500 boqolkiiba.
  - Cilmibaaristii ugu danbaysay waxay muujinaysaa 75 boqolkiiba dadka reer Canada in ay doonayaan in adeegyada dowladda laga dhigo kuwo loo heli karo qaab onleen ah.

## Macluumaadka la xiriira

- [La falgalka Istiraatijiyyadda Dhijitaalka ah](#)

---

[Ufiiri bayaankan qaab onleen ah](#)  
[Qolka Wararka Dowladda Alberta](#)  
[La xiriir dowladda](#)  
[Iska xir](#)